

Kaadhadhka Cimilada ee Caruurta



Waxa horumariyay



Shaqadani waxay ku hoos
shatiyeysan tahay Astaanta
Guud ee Hal-abuurka ee
Aan Ganacsiga ahayn
Shatiga caalamiga 4.0.

Taariikhda dib u eegistii ugu
dambeysay: Maaro 2021

Hordhac

Waxa Loogu Talagalay Daryeelayaasha iyo Macallimiinta

Ku soo dhawoow Kaararka Cimilada ee Carruurta

Isbeddelka cimilada ayaa dhacaya. Saamaynta ayaa la saadaalinaya inay aad uga sii dareyso adduunka oo dhan. Carruurtu waxay xaq u leeyihin in la maqlo ra'yigooda iyo fikradahooda.

Kaadhadhka Cimilada ee Carruurta waxay muujiyaan waxqabadyo dhiirigelin iyo is-dhexgal taxane ah si ay carruurta uga qaybgalaan ajendaha isbeddelka cimilada oo ay ugu baaqaan walqabadyada cimilada.

Sidee kaadhadhku u hawlgeeliyaan Carruurta?

Carruurtu waxay noqdaan sahamiyayasha cimilada! Ku safrida farsamada cimilada adduunka oo dhan, waxay sahamiyaan wixii hore, hadda iyo mustaqbalka.

Kaadh kastaa waxa uu leeyahay aragti-faneed madadaalo leh si uu u barto waxa isbeddelka cimiladu yahay, u una oggaado saamaynta uu ku leeyahay caalamka iyo deegaanka meesha aad kaga nooshahay, iyo in aad dhiirigeliso sheekoooyinka waxqabadka cimilada.

Baaqa Carruurta ee Ficilka Cimilada; Yoolka caalamiga ah

Carruurtu waxay abuuraan ‘Baaqooda ficillada cimillada’ waxayna si ballaadhan ula wadaagaan asxaabta iyo qoyska.

Hadafku waa in la dhiirigliyo baaqa Hawlqabadyada cimilada ee ka imanaya carruurta waddan kasta oo adduunka ah si loogula xisaabtamo masuuliyinta (go'aan qaatayaasha) codka carruurtu bixiyaan.

Gacan ma ka geysan kartaa in aad ka qaybqaadato ku faafinta kelmad murtiyeedka Gobolkaaga?

[Isbaheysiga Cimilada Isbadaleysa ee Carruurta \(CCC\)](#) waa waxa isku baahaystan shan xarumood oo horumarinta carruurta iyo arrimaha gargaarka bani'aadamtinimada; ChildFund Alliance, Plan International, Save the Children, UNICEF iyo World Vision International.

Hagaha isticmaalaha:

Waxa Loogu talagalay daryelayaasha iyo macallimiinta

Yaa loogu talagalay Kaadhadhka Cimilada ee Carruurta?

Carruurta waddan kasta, da'doodu tahay 7-12 sano

Xagee Kaadhadhka lagu isticmaali karaa?

- **Guriga** – oo ay taageerayaan walaalaha ka waaweyn, waalidiinta, awoowayaasha iyo daryelayaasha
- **Dugsiga** – oo lagu dhix daraayo xiisada/maadada juquraafiga, Saynisa (Cilmiga bulshada), aartiska iyo casharada Ingiriisiga amma laylisyada (shaqoguri).
- **Naadiyada carruurta**
- **Xarumaha socdaalka iyo xeryaha**

Intee in le'eg ayay Kaadhadhku qaadanayaan in la dhammaystiro?

Kaadhadh kastaa waxa uu qaataa 30-60 daqiiqo. Soo jeedintu waxay dhammaataa hal mid maalintiiba muddo laba toddobaad gudahood ah. Haddii loo isticmaalo Kaadhadhka duruus gaar ah, ama fadhiyo, waxa sidoo kale la isticmaali karaa muddo dheer.

Waa maxay safarka waxbarasho?

Kaadhadhku waxay raacaan barashada, fal, kasmo-nafeedkaa wadaaga Share padegogy). Ufiirso 'Maabka Hawlgalka' si aad u hesho xog guud oo ku saabsan ujeedooyinka waxbarasho ee isdaba jooga ah, kuwaas oo sidoo kale ku qoran korka kaadh kasta.

Kaadhadhka Cimilada Carruurta iyo Y-Adabt:

Kaadhadhka waxaa loo isticmaali karaa hordhac ahaan si carruurtu ula qabsadaa, ugana qaybgalaan Manhajjka Ka qaybgelinta Da'yarta (Y-Adabt Engagement Curriculum), kaas oo ku dhiirigaliya dhalinyarada da'doodu tahay 13-25 inay qaadaan tallaabooyinka cimilada adduunka oo dhan ah.

Maxaa agab ah e loo baahan yahay?

- Kaadhadhka Kaadhadhka Cimilada ee Carruurta oo Daabacan, Qalimaan iyo Warqad
- Haddii ay suurtagal tahay: Suuragelinta bannaanka u bixid, kamarad iyo internetka

Waa maxay doorkayga taageero ahaan?

- Caawinta akhriska
- Kormeerka hawlaha bannaanka iyo farsamada gacanta iyadoo la isticmaalayo maqas
- Kaalmaynta/taageerida carruurta si ay ula xidhiidhaan dadka kale uguna baaqaan ficiinka cimilada
- Hubinta in carruurtu ammaan ku sugar yihiin oo aanay cid la wadaagin sawirradooda amma goob gaar ah ee ay ku sugar yihiin

Bilaabida...

Tus carruurta kaadhadhka 'Wicista dhammaan Sahamiyayaasha Cimilada' iyo 'Maabka Hawlgalka' si ay u diyaariyaan farsamo cimileed iyaga u gaar ah oo diyaar u ah hawlgallada soo socda. **Safar salaama!**

Tusmada Hawlgalka Khariirada Sawir Cimileedka



Himilada 1aad:
Dhammaan Halaha farsamada cimilada
Baro meesha aad ku noosahay

Himilada 2aad:
Ilaalinta cimilada
Baro waxa cimiladu tahay

Himilada 14aad:
La wadaag sheekadaada cimilada
Tallaabo wadaag!

Himilada 3aad:
Labbiska/dharka cimilada
Baro waxa cimiladu tahay

Himilada 13aad:
Wac fičilka cimilada
Tallaabo wadaag

Himilada 4aad:
Isbeddelka cimilada
Baro in cimiladu isbedelayso

Himilada 12aad:
Diyaar u noqo cimilada
Dooro tallaabo cimilo oo aad hore u qaaddo

Himilada 5aad:
Isku xidhka halista cimilada
Baro sida isbedelka cimiladu u saameeyo cimilada

Himilada 11aad:
Wakhtiga waxqabadka cimilada
Baadh falalka ka socda adduunka oo dhan

Hadafka 6aad:
Caalamku wuxuu saameeyaa maskaxda-maabka
Baro sida isbedelka cimiladu u saameeyo dadka

Himilada 10aad:
Hadafka caalamiga ah, adduunka cagaaran
Wax ka baro ficiilka caalamiga ah

Himilada 9aad:
Xaquuqda carruurta oo taagan
Baro xuquuqdaada iyo isbedelka cimilada

Himilada 7aad:
Gurigaaga caaro-web
Baro in dadka, meelaha iyo arrimuhu isku xidhan yihiiin

Himilada 8aad:
Dabeecadda ayaa caawisa, ugaarsiga dabeecadda
Baro sida dabeecaddu nooga caawiso wax ka qabashada isbedelka cimilada

HALYEETY
LTALOOBO BARASHO
TALAABO FICIL
TALAABO WADAAGAH



Hawlgal, waxaad
ka bilaabi halkan

Talaabooyin
barasho

Talaabooyin
ficiil ah

Talaabooyin
wadaag ah.

Waxaad raacda khariirada hawlgalka si aad ula socoto safarkaaga daahfurka cimilo.

U Baaqida dhammaan sahamiyayaasha cimilada!

**Hawlqabadkkaaga: Dhammaystir hawlo kala duwan si aad wax
badan uga barato adduunkeenna, tallaabo qaad, lana wadaag
firkadahaaga.**

Waxaad samayn doontaa 'farshaxan cimilo' oo aad ku safarto. Waxay ku geyn kartaa mustaqbalka, wixii la soo dhaafay, iyo dhammaan adduunka oo dhan. Adiga oo isticmaalaya 'rabitaanka cimilada' waxaad bedeli kartaa si aad wax ugu aragto indhaha dadka kale.



Dhis amma Samee farsamadaada cimilada

Dib u isticmaal alaabta (agabka) si aad u dhistro amma u samayso farsamadaada cimilada.

Farsamaynta cimilada waxa ay ku shaqaysaa tamarta qorraxda, dabaysha iyo biyaha – tan ma muujin kartaa?

Waxa kale oo ay isticmaashaa wax yar oo indho-sarcaad ah! – Ka dooro walxaha indho-sarcaadka ee aad ugu jeceshahay dabeecadda si aad u sameyso rabitaanka cimilada.

Safarkaaga

Isticmaal khariidada si aad u qorsheysato safarkaaga farsamada gacanta ee cimilada. Marka aad dhamaystirto hawsha, midabee qorraxda, dabaysha ama sawirada biyaha si aad u xoojiso farsamadaada cimilada oo aad ugu guurto hawsha xigta.



Waxaad raacda khariirada hawlgalka si aad ula socoto safarkaaga daahfurka cimilo, waxaanad hubisaa xaga saree e card si aad u aragto qeexitaanka hawlgalka.



Himilada 1: Dhammaan Kaadhadhkooda farsamo-cimileedka

Hawlgalladaada soo socda waxaad ku safri doontaa farsamo-cimileedkaaga si aad u booqato carruurta aduunka oo dhan. Wuxaad baran doontaa meelaha ay ku nool yihiin oo waxaad wadaagi doontaan sheekooyin

1. Aan bilowno safarka anagoo ka fakarna halka aad ku nooshahay

- Ma ku tilmaami kartaa sida uu gurigaagu u eg yahay qof kale?
- Ma jiraan guryo ama dhismayaal kale oo u dhow?
- Goob cimilo dabiici ah ma Ku taala gurigaaga agtiisa?
- Yaa ku nool ama ka shaqeeya meel u dhow meesha aad ku nooshahay?
- Waa maxay meesha aad ugu jeceshahay deegaanka aad ku nooshahay? Saddex sababood ma bixin kartaa? La wadaag jawaabahaaga asxaabta iyo qoyska. Ma isku si bay uga jawaabaan mise si kala duwan?



2. Eeg mustaqbalka

Hadafkaaga ugu horreya waa inaad hore ugu safarto 30 sano oo mustaqbalka soo socda ah oo aad uga warbixiso carruurta kale wixii aad aragtay. Maka shaqayn kartaa sanadka uu noqon doono 30 sanno gudahood?

Bal qiyaas inaad sadaalin karto farsamo-cimilleedkaaga oo aad 30 sanno oo mustaqbalka soo socda ah aad ku safrayso. Deji saacada, kadib taabo soco (Go)...

Waad timid! Bal qiyaas meesha aad hadda ku nooshahay sida ay ekaan doonto 30 sano ee mustaqbalka soo socda. Maxa laga yaabaa inay isbedeleen?

Sawir sida aad u malaynayo meesha aad ku nooshahay 30 sano gudahood. La wadaag sawirkaaga qof kale. Ma waxay u maleeyeen wax ka duwan?



Himilada 2: Ilaalinta cimilada

1. Eegida Saacad Cimileedka

Isku laab warqad 6 leydi ah. Weydiiso qof weyn inuu ku caawiyo haddii aad u baahan tahay. Qor 'daaw cimilada' iyo meesha aad ku noosahay. Ku qor xagga sare ee leydiga 'subaxda', 'saqda dhexe' iyo 'galabnimo'.



Cimiladu waxay noqon kartaa qorrax, daruuro, xilli roobaad, diirimaad, qabow, dabayl, baraf...

Cimilo waa waxa ka dhacaya bannaanka, 'jawiga', meel iyo waqtii gaar ah.

2. Dhig farsamo-cimileeda daaqada oo eeg dibada

Cimiladu waa sidee? Ma subax, duhur mise galab? Ku sawir cimilada sanduuqa saxda ah ee maalinta 1. Wuxaad samaysay daaqadii cimilo ee ugu horeysay! Ku celi tan inta ka dhiman maanta iyo berri si aad u buuxiso daaqadaha.

Eeg saacaddaada cimilada. Dhammaan sawiradu ma isku mid baa, mise waa ay kala duwan yihiin? Maxaad u malaynaysaa inaan ula jeedno 'cimilada'? Ma doonaysaa inaad sii wadato daawashada cimilada? Samee daaqado cimilo cusub oo sii wad.

Miyaad ogeyd...

Qaar ka mid ah diiwaannada cimilada adduunka oo dhan ayaa jiray boqolaal sano! Maxay dadku u duubaan cimilada? Maxay ay muhiim u tahay in la oggaado waxa cimiladu tahay?

3. Miyaad taqaanaa wax heeso ah oo ku saabsan cimilada?

Miyaad samayn kartaa mid ka mid ah saacaddaada cimilada?



Shaquo wacan, waxaad dhamaysay hawlalkii labaad. Wuxaad awoodaysaa farsamadaad cimilo ee khariirada hawlalka, adigoo midabaynaya tamarta dabaysha si aad ugu gudubto hawlalka Saddexaad.



Hawlgalka 3: Labbiska dharka cimilada

1. Aan dibadda u baxno

Bal qiyaas inay tahay maalin kulul. Ku Labbiso (dhar xidho) waxaad xidhan karto ama ku bixi karto. Weydii qof inuu qiyaaso xilliga sannadka aad diyaar u tahay.

Hadda qiyaas inay qabow tahay. Labbiso waxaad xidhan karto ama la bixi karto. Weydii qof inuu qiyaaso xilli sannadeedkka aad ku jirto amma diyaar u tahay.

Ka warran hadduu roob da'yo? ku Labbiso waxaad Ku bixi karto xili roobad ka. Weydii qof inuu qiyaaso xilliga sanadka aad diyaar u tahay.

Si sax ah ma u maleeyeen?
Maxa dharka aad xidhataa ka ka sheegayaan
sida ay tahay cimilada aad caadiyan ku nooshahay?

Cimiladu waa had ba sida jawigu caadi ahaan u eeg yahay, amma celcelis ahaan sida uu muddo dheer ahaa-30 sanno amma wax ka badan goob gaar ah, dal amma gobol. Cimiladu waxa ay saamaysaa sida aynu ka rajaynayno sida jawigu noqonaayo xilliyada kala duwan ee sannadka.



2. Hadda ku bood farsamadaada cimilada – waxaad ka soo gebagebbaysay safar (Tacabur) adduunka oo dhan ah!

Meesha ugu horeysa ee aad ku hakanaysa waa Karibyaanka. Dharkee ayaad u baahan tahay in aad u diyaarsato safarkaa? Maxaad u malaynaysaa in cimiladu (jawiga caadiga ah) Kariibyaanka ay la mid tahay?

Meesha labaad ee aad ku hakatay waa Arctic. Dharkee ayaad u baahan tahay in aad u diyaarsato safarkaa? Maxaad u malaynaysaa in cimiladu (jawiga caadiga ah) ee dacalka adduunka ee Artiku ay tahay?

Waa go'aankaaga halka ku xigta ee aad tegi lahayd... Maxaad u malaynaysaa in cimiladu (jawiga caadiga ah) halka aad dooratay uu yahay?



Hawl-qabadka 4aad: Midabaynta Isbeddelka Cimilada

Aan ku noqono waqtigii suurayntaada (Farsamadaada) Cimilada

Ma ka fikiri kartaa qof degaankaaga ku noolaa 30-kii sanno ee u dambeeyey?

Waxa laga in uu noqon karaa awoowgaa/
Ayeeeydaa, waalidiintaa (Abbe iyo Hooyo),
qof ka masuul ah amma jaarkaaga (jiirankaaga)?

Wac, farriin u dir, booqo amma u qor waraaq
aad ku shareaxayso wax aaad ka baratay
cimilada (Jawiga caadiga), kadib waydii:

"Cimiladu miyey ka duwanayd sida ay
maanta tahay 30 sanno ka hor goobta aad ku nooshahay?"

"Haddii cimiladu isbeddeshay, ma sida aad hadda ugu
nooshahay bay isu beddeshay?"



Saynisyahanno sare ayaa isu raacay in 'Jawigu' ama 'cimiladu' ay isbeddelayso adduunka oo dhan. Dadka adduunka ayaa sidoo kal e dareemaya isbeddelada jawiga caadiga ah mar marka ka dambaysa.



2. Waa maxay is-beddelka cimiladu?



Dhulku waxa uu tamartiisa oo dhan ka helaa Qorraxda (Cadceeda). Kala badh tamartaas waxa ay ku dhacdaa oogadiisa sare, waxna waxa ay dib ugu noqdaan hawada sare.

Qaybo ka mid ah tamartaas na waxa xayira gaasta cagaaran ee hawada inagu xeeran ku jirta. Waxa ay dunida ka caawisaa-gaasta cagaaran-in dadka, dhirta iyo xayawaanka helaan heer-kul ku habboon ee ay u baahan yihiin si ay ugu nooladaan.

Guud ahaan 200 sanno ee u dambeeyey, dhaqdhaqaqa dadku waxa uu kor u qaaday xaddiga gaasta cagaaran ee hawada ku jirta.

Gaasta Cagaaran oo badan, macnaheedu waa in tamar badan ku xayiran tahay hawada, taasoo keenta in dunidu kululaato. Tana waxa aan ugu yeedhnaa "Kulaylk Caalamiga ah.

Kulaylk dunidu waxa uu saamayn ku yeeshaa hababka jawiga cimiladeena mar marka dambaysa. Taasina waxa ay keentaa in jawiga ama cimiladu ay isbeddelaan adduunka oo dhan.

Isbeddelka cimilada waxa uu sidoo kale Keenaa dhacdooyinka cimilada ay xad-dhaaf noqdaan ama ay marar badan ka dhacaan adduunka oo dhan.

Midabee sawirka sare amma sawir adigu si aad wax uuga ogaato is-beddelka cimilada.

Ma isticmaali kartaa sawirrada si aad u sharraxdo sababaha isbeddelka cimilada shakhsii kale? Si wada jir ah uga wada hadla sababta isbeddelka cimiladu uu caqabad ugu yahay.



Si wanaagsan ayaad u samaysay, waxa aad dhammaysay hawl-galka 4aad.

Ku xooji farsamadaada cimilada kharariida hawl-qabadka, adigoo midabaynaaya tamarta qorraxda, una gudub hawl-qabadka 5aad.

Himilada 5: Isku xidhaanta khatarta cimilada

1. Aynu aragno sida cimilada, jawiga, iyo khataruhu isugu xidhmaan

Fiiri sawirada cimilada ee sanduuqyada labajibbaaran.


Fiiri sawirada khataraha aduunka ee wareegyada.

Nooc cimilo oo aad u badan ama aad u yar ama 'cimilo daran', waxay keeni kartaa khataro.

Miyaad ku xidhi kartaa cimilada aadka u daran iyo khataraha ay keento?

- Ku xidh xadhig qaro weyn haddii ay khatartu ka timid roobka, dabaysha ama qorrxada badan
- Ku xidh khad dhibco leh haddii khatartu ay sababto roob yar, dabayl ama qorrx.

Khatar



2. Kala hadal qof kale khataraha ka dhacaysa meesha aad ku nooshahay?

Ka hadal isbeddelka cimilada oo ku sheeg dhacdooyinka cimilada ba'an ee soo noqnoqonaya.

Sidee tani u saamayn kartaa dadka adduunka oo dhan? Ka war-bixi meesha aad ku nooshahay?

Si wanaagsan ayaad u samaysay waxaad dhamaystirtay

Hawlgalka 5aad. Ku xooji farsamadaada cimilada

khariidadda hadafka adiga oo midabaynaya tamarta

biyaha una gudub hawlgalka 6aad.

Cullimada Saynisyahhanada ugu sarraysaa waxa ay isu raaceen in isbeddelka cimiladu sababaayo dhacdooyin cimilleed daran oo sii xoogaysanaya, siina badanaaya adduunka oo dhan. Jawi cimileedka daran waxa uu keenaa khatar saamamaysa dadka.



Hadafka 6: Saamaynta Qorshe Maskaxeedka Khariirada Caalamka

1. Wuxuu aad ku hawlan tahay tahay inaad la kulanto dadka adduunka oo dhan. Sidee bay isbeddelka cimiladu u saameyn kartaa?

Emma, Marshall Islands

Hello..... Magacaygu waa Emma. Wuxaa aad ku noolahay magaaloo u dhow xeebta. Wuxaan jeclahay ciyaarista kubbadda koleyga. Wuxaan joogaa kuleej aad ka barto sayniska, maadaamaan rabo inaan ka qaybqaat caawinta diyaargarawga oogu iro wax ka qabashada kor u kaca heerka badda. Duufaan weyn ayaa jirta.

Dhisnayaal ayaa burburay. Waddooyinkuna way xidhan yihiin. Sidee tani u saameyn kartaa Emma?

Maria, Honduras

Maria, Honduras
Hola (Hello).... Magacaygu waa Maria. Wuxaa aad caloosha ku sidaa ilmahaygii saddexaad. Wuxaa aad ku noolnahay magaalada. Waa kuleyl, roobabka ayaanaa sii xoogeysanaya oo sababay fatahaado

Kaneecadu wuxaa ay xanbaarsan tahay cudurro; axa ay jecel yihiin kulaylka iyo biyaha daadsan. Sidee tani u saameyn kartaa Maria?

Jean, Faransiiska

Bonjour (Salaan). Magacaygu waa Jean. Wuxaan ahay 75 jir. Wuxaa aad ku noolahay keligay magaalada. Waan ku raaxaystaa joogida bannaanka iyo beerta, laakiin wuxaa aad jecelahay waa marka ay carruurtaydu i soo booqdaan!

Waxaa jira kulayl - kii ugu kululaa abid ee ka dhaca Faransiiska. Sidee tani u saameyn kartaa Jean?

Priya, India

Namaste.... Magacaygu waa Priya. Wuxaa aad kacaa goor hore maalin kasta si aad biyo ugu soo dhaamiyo qoyskayga. Kadib wuxaa aad raaca walaalkay si aad ugu lugeeyo dugsiga. Wuxaa jeclahay waxbarashada. Wuxaa aad rajaynayaa in aad dhakhtar noqdo Maalin uun.

3 bilood roob ma di'in. Biyo la'an daran ayaa jirta. Waa lagama maarmaan in hore loo sii socdo si loo helo biyo. Sidee tani u saameyn kartaa Priya?

Axmed, Tanzania

Salaamu caleykum.. Magacaygu waa Axmed. Wuxaan ahay beeraley, waxanan la noolahay qoyskeyga. Wuxaa aad beeranaaaa galley iyo digir aad cuno iyo lawska (cashew nut shell) si aad u iibino.

Waxaa aannu ku tiirsanahay beero falashada. Xilli roobaadkii ayaaisbedelaya. Tani waxay saamaysaa xilliga koritaanka dalagyada. Sidee tani u saameyn kartaa Axmed?

Isbeddelka Cimilladu iyo Jawi cimileedka darran wuxaa ay u saameeyaa si ala duwan dadka adduunka ku nool.

2. Ma ka fikiri kartaa siyaabo kale oo isbeddelka cimiladu si kala duwan u saameyn karo dadka? Maxay ugu saameyn kartaa si kala duwan?

Si wanaagsan ayaad u samaysay wuxaa dhamaystiray Hawlgalka 6.

Ku xooji farsamadaada cimilada khariidadda hadafka adoo midabaynaya tamarta dabaysha si aad ugu guurto Mission 7aad.



Himilada 7: Gurigaaga, Shabag-Careedka oo kale ku nashqadee!

1. Bal aynu samayno khariidad - waxaad sawiri kartaa, farsamayn kartaa, rinji, qaabayn (Model) - noqo mid hal abuur leh! Bal qiyaas inaad ku jirto safarka farsamada cimilada ee meesha aad ku nooshahay, ama u socoto. •

Ku dar '**goobo**' khariidadaada - Ka fikir
meelo kala duwan oo aad ku nooshahay.
Maxay muhiim u yihiin?

Ku dar '**dad**' khariidadaada - Ka fikir
shaqooyinka ay dadku qabtaan meesha
aad ku nooshahay. Maxay muhiim u yihiin?

Ku dar '**waxyaabaha**' khariidadaada - Ka
fikir waxyaabo kala duwan meesha aad ku
nooshahay. Maxay muhiim u yihiin?

Dadka, meelaha iyo arrimuhu
waa isku xidhan yihiin oo
midba midka kale ayuu
ku tiirsan yahay. Tani waa
muhiim marka aan ka fikirno
saameynta isbedelka cimilada
iyo cimilada xun. Haddii hal
meel ay saamayso tani waxay
saamayn kartaa meel kale,
ama qof, ama shay. Haddii
tani ay saameyn dheeraad
ah yeelato waxa ay keeni
kartaa dhibaato weyn.



2. Shabakadda caarada!

Ma arki kartaa isku xidhka
dadka, meelaha iyo walxaha?
Ku sawir khadadka si aad ugu
xidho khariidadaada
oo u samee shabakad weyn oo ta caarada oo kale ah!

3. Bal qiyaas in ay jirto cimilo aad u xun - ku sawir xiddigaha agtooda
dadka meelaha iyo waxyaalaha khatarta ku jira. Raac khadadka caarada si aad u aragto haddii
dad kale, meelo ama waxyaabo ay saameyn ku yeelan karaan. Maxaad bedeli kartaa si aad si
wanaagsan ugu diyaargarowdo?

Hawlgalka 8aad: Dabaciiga Caawimada Dabiiciga Ugaadhsiga

1. Maxaad u malaynaysaa marka aynu llenahay "Dabiici"?

Waa muhiim in aan ilaalino dabeeecadda maadaama ay nagu caawiso siyaabo badan oo kala duwan waxayna naga caawin kartaa inaan u diyaargarowno isbedelka cimilada.

1. Isticmaalka waxyaabaha dabiiciga ah

Ka fakar halka waxyaabaha kugu xeeran waxa ay ka yimaadeen. Maxa agab ah oo ay ka samaysan yihiin? Dhirtu waxay ina siisaa midho, khudaar iyo dawooyin. Xayawaanku waxa ay ina siiyan cunto, geeduhuna waxay ina siiyan qoryo.



4. Noolaynta waxyaabaha dabiiciga ah iyo meelaha

Dabiicyadu waxay noolaysaa dhammaan waxyaabaha iyo meelaha ba. Sideed u malaynaysaa in tani ay inagu caawinayso? Ma ogtahay...

- Dhirtu waxa ay qorraxda u isticmaashaa in ay cuntadooda ku samaystaan, si ay u koraan.

2. Ku raaxaysiga meelaha dabiiciga ah

Dad badan ayaa ku raaxaysan meelaha dabiiciga ah. Maxaad ku qabataa meelaha dabiiciga ah ee madadaalo ah? La ciyaarista ciyaaraaha bannaanka ee saaxiibada, dalxiiska gaaban ee qoyska, socodka, dabbaasha webiyada.

3. Ilaalinta waxyaabaha dabiiciga ah iyo meelaha

Dabiiciga ayaa kaa caawin karta in ay is ilaaliso. Sidee u malaynaysaa in tani ay inagu caawinayso? Ma ogtahay...

- Geeduuhu waxay kaa caawin karaan nadiifinta hawada iyo biyaha. Geeduuhu waxa kale oo ay gacan ka geysan karaan xakamaynta biyaha si loo yareeyo khatarta fatahaada iyo dhul go'a
- Shinnidu waa qaar ka mid ah xayawaanka ugu muhiimsan adduunka. Waxa ay bac-riminta caawiyaan ubaxa, miraha iyo khudaarta. Tani waxay ka dhigan tahay shinnidu waxay caawisaa dhirta kale in ay koraan.
- Dhirtu waxa ay kaa caawin kartaa ilaalinta dhulka iyo xeebaha yaraynta duufaannada iyo kor u kaca heerka badda..

2. Ugaadhsiga dabeeecadda:

Hoggaami ugaarsiga dabeeecadda meesha aad ku nooshahay. Ka raadi bannaanka ama agagaarka gurigaaga.

Ku qor waraaq yar 'Isticmaalka', 'Ku raaxaysanaya', 'Xannaanayn' iyo 'ilaalinta'!

- 10 daqiqiyo gudahood u hel tusaalayaal inta aad karto ah oo muujinaaya sida dabiiciiyadu inoo caaiso.
- Hal abuure noqo! Caleentu waxay noqon kartaa Laamo ama geed. Koob biyo ah wuxuu noqon karaa webi haro ama bad. Waxaa laga yaabaa in qaar ka mid ah midho amma khudaar yihiina. Sawirka adoo bannaanka ooga

Shakhsu u Sharax tusaalayaashaada, immisa ayaad heshay?

Sawir qaad oo xafid hadhow.

3. Miyay qaar ka mid ah siyaabaha dabiiciga ahi inoo caawiyaan, sidoo kale waxa ay naga caawin karaan wax ka qabashada isbedelka cimilada iyo cimilada daran?

Ma ka fikiri kartaa siyaabo aan ku caawin karno daryeelka dabeeecadda?

Si wanaagsan ayaad u samaysay waxaad dhamaystirtay Hawlgalka 8aad.

Ku xooji farsamadaada cimilada khariidadda hadafka adiga oo ku
midabaynaya tamarta qorraxda una gudub hawlgalka 9aad.



Hadafka 9: Xuquuqdaada carruurta, Istaaga

1. Si a mid ah dhammaan sida carruurta adduunka oo dhan, waxaad leedahay xuquuq gaar ah.

Maxaad u malaynaysaa in ay yihiin xuquuqahaagu, ama ay tahay inay noqdaan? kala hadal qof kasta dhammaan xuquuqdaada, adigoo isticmaalaya jidhkaaga:

WAAD
KU
SAXSANTAHAY...

caafimaad qab,
biyo nadiif ah,
cunto,
iyo ciyaar ku ciyaarada meel ammaan ah,
meelo nadiif ah iyo in aad fikradaada
cabirto laguna dhegays amma maqlo.

Dhammaan dalalka
adduunku axa
ay isku raaceen
in ay uani yihiin
xuquuqaha ay tahay
in ay carruurtu
yeeshaan, laguna
daro shuruucda
caalamiga ah

2. Sidee buu isbeddelka cimiladu u saameyn karaa xuquuqdaada?

Ma tilmaami kartaa meesha ay saameyn kugu yeelan karto xuquuqda
carruurtu adiga oo isticmaalaya khariidadda jirka? Xuquuqda carruurta
miyey ku kala duwan u saamaysaa magaalo, baadiyahaha ba?



Mowjadaha kulaylka
ayaa sababi kara kulayl
ka-soo-baxa kaas oo
dadka ku keena xannuun.
Daadadka iyo kulaylku
waxay u horseedi karaan
kaneeco badan oo
cudurro xambaarsan.
Isbeddelka cimiladu
sidoo kale waxa ay inagu
keeni kartaa walaac aad u
badan oo aan la hubin.



Kulaylka ba'an wuxuu
u horseedi karaa
biyo yaraan, taasoo
adkeynaysaa in la beero
dalaga iyo in xoolaha la
dhaqdo. Isbeddelada
qaababka cimilada
waxay sidoo kale
carqaladnaysaa in la
beero dalagyada.



Daadka, duufaanada,
kulaylka waxay dhaawici
karaan dhismayaasha
dugsiga & buugaagta,
ama waxay joojin karaan
carruurta iyo macallimiinta
inay dugsiga tagaan.
Dugsigaaga weligii ma
saamaysay cimilo aad u
xun? Dugsiga, miyaad
ka heshaa macluumaa
kugu filan oo ku saabsan
isbeddelka cimilada iyo
dabeeecadda?



Dhacdooyinka cimilada
aadka u duran waxay
dhaawici karaan meelaha
ay carruurtu jecel yihiin
inay ku ciyaraan. Ma
leedahay meelo nadiif ah
oo ammaan ah oo aad ku
ciyari karto? Ka warran
meelaha dabiiiciga ah?




Dadka waaweyn
miyay ku
dhegystaan
markaad su'aalo
waydiinayso ama
aad ka hadlayso
kulaylka, daadka,
ama isbeddelka
cimilada? Miyaad
dareentaa in
fikradahaaga iyo
fikradahaagu ay
muhiim yihiin?

3. Xuquuqdaadu waa muhiim marka aad qaadayso tallaabada cimilada

Carruurta adduunka oo dhan waxay u taagan yihiin xuquuqdooda si ay ugu muujiyaan
isu soo baxyadaa cimilada. Dooro xuquuq khatar ku jirta sababtoo ah isbeddelka
cimilada. Samee calaamad ay ku qoran tahay "waxaan xaq u leeyahay inaan..."

Sawir qaado oo hadhow...

Ma tusi kartaa calaamaddaada dadka kale ama xitaa ma geyn kartaa isu soo bax dadweyne?
Hubi inaad raacdo qof weyn, qorshee badbaadadaada haddii aad kala tagtaan amma
kala luntaan qofka, ku raaxayso si codkaaga loo maqlo!



Si wanaagsan ayaad u samaysay waxaad dhamaystirtay Hawlgalka 9aad.


Ku xooji farsamadaada cimilada khariidadda hadafka adiga oo ku
midabaynaya tamarta biyaha una gudub Mission 10.



Himilada 10aad: Hadafka caalamiga ah, adduunka cagaaran

1. Waxaan nahay hal adduun. Dhammaanteen waxa isu keen xidha hawada aan neefsaneeyno, biyaha aan cabno iyo cimilada nagu wareegsan. Ma xasuusan kartaa waxy keenaya isbeddelka cimilada? U fiiroso hadafka 4aad (xasuusin).

Si loo joojiyo isbeddelka cimilada oo sii xumaanaya dhammaan dalalku waa inay iska kaashadaan sidii loo dhimi lahaa sii daynta qiiqa gaasta cagaaran si aan adduunkeena uga dhigno mid cagaaran. Waxy ayuu u baahanahay hogamiyayaasha adduunka in qaataan oo ay go'aansadaan isbedel weyn. Ma malayn kartaa tusaale? Maxa ay awood leeyihii farsamooyinkaa cimiladu?



DHIIRIGALIN

“Ma jiro da’ ku xidhan in qofku isbeddel sameeyo”

- Greta Thunburg

2. Isbeddellada yaryar waxay noqon karaan bilowga isbeddel weyn.

Eeg tusaalooyinka shaxda si aad u heshid fikrado ku saabsan sida aad u yareyn karto qiiqa gaasta cagaaran:

Shidaalka saliida iyo dhuxusha waxay dhaliyaan tamar si ay u kordhiyaan warshadaheena, baabuurta iyo guryaha, laakiin tani waxay sidoo kale sii deysaa qiiqa gaasta cagaaran oo. Isticmaalka tamarta qorraxda, dabaysha iyo biyaha ma sii daayaan gaasaska cagaaran. Waddamada adduunku waxay samayn karaan isbeddel weyn si ay u isticmaalaan ilahan tamaraahas kor ku xusan.



3. Shaxda ku dheji gidaarka, ku dar fikradahaaga, ama samee noocaaga.

Bal eeg inta isbeddel ee adiga iyo qoyskaagu samayn kartaan usbuucan. Ku hay xisaabinta sanduuqyada. Ma sii wadi kartaa?

Si wanaagsan ayaad u samaysay waxaad dhammaysay Hawlgalka 10aad.

Ku xooji farsamadaada cimilada khariidadda hawlqabadkaa adiga oo midabaynaya tamarta dabaysha una gudub hawlqabdka 11aad.



Himilada 11: Sheeko waqtiyeeda waxqabadka cimilada

1. Isbeddelka cimilada ayaa dhacaya. Carruurta adduunka oo dhan ayaa qaadaya tallaabo ay 'ugu diyaarsan yihiin cimiladu.'

Bal qiyas in aad tahay wariye-wareed ku sugar hawgalka farsamada cimilada si aad wax badan u ogaato. Bal qiyas inaad waraysanayo caruur ka kala yimid wadamada kala duwan ee hoose. Xageey ka yimaadeen? Waa maxay khatarta cimiladu? Waa maxay tallaaboooyinka ay qaadayaan sida ay cimiladu u diyaarsan tahay?

Miyaad qori kartaa ama ma duubi kartaa warbixin ku saabsan laba fal oo kala duwan?

Warbixintaada cid la wadaag wadaag oo sheeg wax aad ka heshay oo xiiso leh oo ku saabsan fal kasta.



Mowjadaha kulaylka: Lubnaan

Waxa aan booqanaynaa waayeelka deriskeena ah si aan ula soconno, u xasuusino in aanay dibadda u bixin maalinnimadii, biyo badana cabaan.



Kor u kaca heerka badda & duufaannada: Jasiiradaha Marshall

Waxa aannu diyaarinay bac ay ku jiraan waxyaboo muhiim ah haddii ay dhacdo inaan si degdeg ah uga baxno gurigayaga inta lagu jiro duufaan.



Dareen werwer leh: UK

Waxa aannu u qornay waraaqo dawladeena aan ku socodsiinay si aanu u waydiisano casharada isbeddelka cimilada ee dugsiga si aan wax uga barano talaaboooyinka aan qaadi karno.



Daadad: Haiti

Waxaan bilownay naadiga cimilada carruurta waxaanan nadiifin jirnay dugsigeena iyo waddooyinka bishiiba mar si loo yareeyo khatarta fatahaadda.



Cudurada: Honduras

Waxa aan baranay kaneecada in ay xanbaarto cuduro iyo korodhka daadadka iyo kulaylka, sidaas darteed waxaan ka codsanay waalidiinteeena inay iibsadaan maro-kaneecada.



Biyo yaraan: Indonesia

Waxa aan ku beernay beer khudaar ah dugsiga oo waxaan u isticmaalnay dheryo dhoobo ah waraabka qunyar socodka ah, si aanaan biyaha u khasaarin.



Waxyeellada dabiiiciga ah: Filibiinw

Waxa aan raacnaa asaxaabtayada si aan dibada ugu soo qaadano maalmo madadaalo ah iyo qoyskayada si aan u ogaano dabeeecadda oo aan u fahanno sababta ay muhiim u tahay in la ilaaliyo.



Isbeddelka roobka: Tansaaniya

Waxaan booqanay wakaaladayada cimilada waxa aanu ogaanay in aanu ka heli karno wararka cimilada si farriin (SMS) ahaan ah. Waxaan u sheegnay qoysaskayaga, si ay iyaguna u ogaadaan.



Si wanaagsan ayaad u samaysay waxaad dhamaystirtay Hawlgalka 11aad.

Ku xooji farsamadaada cimilada khariidadda hadafka adoo midabaynaya

tamarta qorraxda una gudub hawlgalka 12aad.



Himilada 12: Diyaar u noqo cimilada

1. Dib u qiyaas mustaqbalka,

xusuusnow hawshii ugu horeysay ee farsamada cimilada laad markaad u safartay mustaqbalka? Fiiri sawirkaaga sida aad u malaynayo meesha aad ku nooshahay 30 sano gudahood. Ma ku dari kartaa wax si aad aragtidaada mustaqbalka uga dhigto mid 'cagaaran' iyo 'cimilo diyaarsan'?



2. Cimiladu diyaar u noqo - dooro caqabadaada,

u fiirso khariidadda amma shabakada caarada ee meesha aad ku nooshahay, laga bilaabo Hawlgalka 6aad Ka fikir sida isbedelka cimiladu kuu saameyn karo. Siddeed cimiladu diyaar ugu noqon kartaa? u fiirso hawlgalka 11aad iyo ficiinka cimilada ee carruurta adduunka oo dhan fikradoohada Dooro mid ka mid ah falalkan, ama ka fikir mid ka duwan, si aad horay ugu sii wado meesha aad ku nooshahay.

Qor waxa ficiinkaagu yahay.

3. Samee qorshe hawleed

Ma u baahan tahay qalab ama qalab? Ma wax aad keligaa samayn karto, mise waxaad u baahan tahay saaxiibo, qoys ama macalimiin inay ku caawiyaan? Sideed uga dhaadhicin kartaa dadka kale inay ka qayb qaataan?

Ma ka fikiri kartaa hab madadaalo leh oo aad ku tusi karto sababta falku muhiim u yahay?

Waxaad samayn kartaa bandhig waxqabad – hees qaad, samee qoob ka ciyaar, sawi, majaajillo, qor maqaal joornaal ah, ma ku naqshadeyn kartaa boodhadh, ka sheekhee sheeko, muuqaal warbixin wareed, samee ciyaar...



Sawir qaad ama duub bandhigaaga.

4. Samee tallaabadaada nolosha dhabta ah si aad u noqoto mid u diyaarsan cimilo

Ha iloobin inaad kaydiso diiwaanka horumarkaaga!



Himilada 13: Baaqa Tallaabooyinka Cimillada

Carruurta waxa saameeya isbeddelka cimilada maanta, waxayna saameyn doonaan mustaqbalka.
Ka Fikir tallaabada aad qaadayso si meesha aad ku nooshahay cimilada diyaar ugu noqoto.

1. Aan ugu baaqno hoggaamiyeyaasha adduunka in ay u dhaqmaan si ay u taageeraan carruurta iyo si ay u diyaariyaan cimilada adduunka

Qaado warqad. Gees u sair adiga oo ku daylinaya inta aad awooddo. Hoos ku qor magacaaga koowaad, da'daada iyo dalkaaga.

Ku sawir inta aad afkaaga fallaadh ka saarto goobo xubmeed geli oo u qor hadal geesinimo lehsii aad u buuxiso bogga oo dhan.

Dhexda ku sawir khatarta cimilada ee adiga ku saamaynaysa oo ku qor waxa ka hoosaya.

Dusha sare ee xumbo hadalkaaga ku qor 'Tallaabo ka qaada cimillada hadda' si aad ugu yeedho hoggaamiyeyaasha adduunka inay wax qabtaan.



2. Caqabaddaada:

Ku dhiiri geli inta carruur ah ee aad awooddo inay codkooda ku daraan khariidada si aad u samayso baaqa ficiilka.

Aan aragno haddii aan ka heli karno Baaqitaana "Baaqa Cimilada ee Waqtigan" carruurta waddan kasta.

Aan dhawaaqa ka dhigno mid aad u weyn oo ay madaxdu dhegaystaan!

Si wanaagsan ayaad u samaysay waxaad dhamaystirtay Hawlgalka 13aad.

Ku xooji farsamadaada cimilada khariidadda hadafka adoo midabaynaya tamarta dabaysha una gudub Hawlqabada 14aad.



Himilada 14aad: La wadaag sheekadaada cimilada

Ku dhammaystir safarkaaga
farsamada gacanta
sheekadaada baaq cimileed
ee adiga kuu gaar ah.

Weydii qof inuu muqaal ahaan kuu
sheego adigoo leh:

- **Waxaan xaq u leeyahay inaan...**
[kor u qaado calaamaddaada hawlgalka 9aad]
- **"Tani waa aragtidayda cimilo diyaarsan
oo mustaqbalka cagaaran..."**
[kor u qaad cimilada 1 sawir mustaqbalka]
- **"Tani waa tillaabada aan qaaday si ay inooga caawiso
inaan halkaas gaadhno..."**
[la wadaag bandhiga waxqabadkahkanadafka 12iyo/ama diiwaankaaga ficolka]
- **"...Tani waa baaqa aan jeedinayo hoggaamiyeyaasha adduunka
inay qaadaan tillabo cimileed hadda"**
[kor u qaad hadafka 13 adiga oo u badalaya ficolka]

Sheekadaada ma la wadaagi kartaa asxaabtaada iyo qoyskaaga? Miyaad ku dhiirigelin kartaa
inay qabtaan hawlaha farsamada cimilada si ay u abuuraan sheekooyinkooda cimilada?

**Aynu caawino inaan dad badan ka dhigno halka aad ku nooshahay iyo
dhammaan cimilada adduunka oo dhan diyaar!**

